

XAASHIDA SADDEXAAD EE KACAANKA

(F.R. (B.U.) L. 7 ee Luulyo 1976)

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY... TIXGELIYEY...AQOONSADAY...ISAGOO FULINAAYA: Mabaadi' dii iyo ujeeddooyinkii Lagu Cadeeyay Xaashida Loowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka, iyo go' aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka fadhigiisha 8da Juunyo 1976;

WUXUU GUDDOOMIYEY

1. Marka laga billabo **1da Luulyo 1976** waxaa la dhisay XISBI Siyaasi ah ee waddani ah laguna magacaabo XISBIGA HANTIWADAAGGA EE KACAANKA SOOMALIYEED
2. Xisbigu wuxuu lahaan doonaa astaan iyo jiritaan sharci ah.
3. Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed **waa midka qura ee ka jiri kara Dalka** Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaliya, **lamana abuuri karo Xisbi kale ama urur siyaasi ah** oo aan ahayn midka ku xusan Qodobka laad ee Guddoonkan.
4. Xisbiga Xaruntiisu waxay noqoneysaa Xamar, wuxuuna ku yeelan karaa laamo iyo xubno Gobollada, Degmooyinka, Tuuloonyinka, **Wasaaradaha, Wakaaladaha, Warshadaha, Xurumaha Ciidammada Qalabka Sida** iyo hadba meeshii kale ee looga baahdo.
5. Calaamadda Xisbiga waa BURRUS iyo YAAMBO isdhaafsan oo XIDDIGTA calanka Soomaaliyeed kor ka saaran tahay iyo labo CALEEMOOD oo ku wareegsan.
6. Xisbigu wuxuu sii wadayaa Mabaadi' dii iyo Siyaasaddii Kacaanka ee ku caddeyd Xashiida Koowaad ito tan labaad ee Kacaanka Oktoobar, ujeeddadiisuna wa **hirgelinta Mabda'a Hantiwadaaga Cilmiga ku dhisan** eek u cad Xaashida Labaad ee Kacaanka.
7. Xisbigu wuxuu yeelan doona destuur u gaar ah iyo xeer hoose oo saameeya qaabka iyo habka maamulka Xisbiga.
8. Marka laga billabo kowda Luulyo 1976, Golaha Sare ee Kacaanku, **xukunkii iyo awooddii maamulka Dalka ee uu kula wareegay Sharciga lamnarkiisu yahay 1 (kow)**

ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969, wuxuu ku wareejiyay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed-Golaheeda Suyaasiga ah.

9. Muddo shan sano gudaheeda, haddii aanay umaanin dhibaato laga fursan waayay, waa in la soo saaro Dastiirkii lagu maalulayay Dalka.
10. Muddada ku meel gaarka ah, ka hor intaan la soo saarin Dastuurka Dalka, awooda sharci dejinta Dalka waxay Guddiga Dhexe EE Xisbigu u xilsaari doontaa Guddi gaar ah oo uu Guddoomiye ka yahay Xoghayaha Guud ee Xisbiga ama cid ka wakiil ah.
11. Xubnaha Guddiga kor ku xusan iyo habka uu ku shaqayn doono waxaa lagu soo saari doona xeer u gaar ah.
12. Guddoonkaani wuxuu dhaqaan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.